

Ogow Xaqiyooyinka ku saabsan Bablik Jarj

Waraaqdan xaqaa'iqda ku xusan baddal uma aha talada sharciga ah. Dadka ka welwelsan sida gunnooyinkooda dadweynaha ay u saameyn karaan xaaladdooda qaxootinimada waa inay caawimaad weydiistaan qareenka socdaalka.

Markii u dambaysay la cusboonaysiiyay Disembar 19, 2022

Laga soo bilaabo Maars 9, 2021, sharciga la ballaariyey ee bablik jarj ayaa loo xannibay si joogto ah. Hadda kama dhaqan gashana meel kasta oo Mareykanka ah. Tani waxay ka dhigan tahay:

- Soogalootiga waxay si badbaado leh u heli karaan gunnooyinka caafimaadka dadweynaha, nafaqeeynta iyo guryaha.
- Gunnooyinkan ma saameyn doonaan xaaladdooda scodaalnimo.

Markay ahayd Sebtembar 8, 2022, Waaxda Amniga Gudaha ee Mareykanka ayaa soo saartay sharci cusub oo soo celinaya fahamka "bablik jarj" kaas oo jiri jiray tan iyo 1999-kii.

Xeerka cusub ayaa lagu dabaqi doonaa dhammaan codsiyada socdaalka ee la xareeyay kadib Disembar 23, 2022. Dhanka kale, Hay'adda Adeegyada Dhalashada iyo Socdaalka ee Mareykanka (USCIS) waxay raaci doontaa [Egasakatif Odhar 14012](#) ee Madaxweyne Biden oo waxay isticmaali doontaa siyaasadaha bablik jarj ee lagu dejiyay [Inteerim Fiildh Gaaydhans 1999](#).

Sharciga bablik jarj ee 1999 hadda wuu shaqeeyaa, laakiin xusuusnow in:

- Soogaleeti badan aaya laga dhaafay sharciga bablik jarj.
- Soogalootiga badankooda u qalma kaalmada dadweynaha ay ka reebban yihii sharciga bablik jarj.
- Kaalmooyinka intooda badan ee ay helaan caruurta soogaleetiga ama xubnaha kale ee qoyskoodu ma ah mid la eegayo marka la marayo tijaabada bablik jarj ee Mareykanka gudihiisa.

Tixraac [bogga websaydka Khayraadka Bablik Jarj](#) ee Hay'adda Adeegyada Dhalashada iyo Socdaalka ee Mareykanka (U.S. Citizenship and Immigration Services, USCIS) si aad u hesho wixii maclumaaad dheeraad ah.

Sharciga bablik jarj ma khuseeyo badi dadka u qalma gunnooyinka dadweynaha.

Dadka aan u dhalan dalka qaarkood ayaa laga dhaafay sharciga bablik jarj, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn:

- Codsadayaasha raadinaya qaxooti ama magangalyo;
- Deganaanshaha rasmiga ah ee Mareykanka oo ay ku jiraan kuwa dib u cusboonaysiinaya giriin kaadh;
- Dadka aan muwaadiniinta ahayn ee doonaya aqoonsiyada T (dhibbanaha ka ganacsiga dadka) ama U (dhibbanaha fal dambiyedka);
- Codsadayaasha doonaya Temborari Borotektedh Isteetaas (TPS);
- Dadka iskood u cogsada ee hoos yimaada Faayolens Agenist Wumen Akt (VAWA);



- Dhallinyarada soogalootiga ah ee gaarka ah;
- Codsadayaasha doonaya sii-daynta sharafeed ee milatari (PIP).

Waa maxay barnaamijyada gunnooyinka dadweynahay ee lagu xisaabiyo bablik jarj?

Hadda, sharciga bablik jarj ayaa kaliya tixgelinaya isticmaalka barnaamijyadan:

- Temborari Asistans foo Niidhi Familis (TANF, oo ah gunno lacageed oo bille ah);
- Barnaamijyada kale ee gargaarka lacageed ah ee Gobolka, Qabiilka, Xuduudaha, ama deegaanka ("Jeneraal Asistans");
- Sablimental Sekuriti Inkam (SSI); iyo
- Barnaamijyada dawladda ee taageeraya dadka ku nool xarumaha daryeelka muddada-dheer, sida guriga kalkaalinta ama xarunta caafimaadka dhimirka.

Waa maxay barnaamijyada gunnooyinka dadweynaha ee aan lagu xisaabin bablik jarj?

Kaalmooyin badan, sida kuwa ku xusan liiska hoos ku qoran, waa ammaan **lagumana** tixgeliyo imtixaanka bablik jarj:

- Caymiska Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP) ee loogu talagalay:
 - Dhalinyarada ka yar 21 (sida, Medicaid, Barnaamijka Caymiska Caafimaadka Carruurta (Children's Health Insurance Program, CHIP) iyo Kavar Ool Kidhis)
 - Dadka qaangaarka ah ee uurka leh (sida, Medicaid iyo Qorshaha Caafimaadka Muwaadiniinta ee Laga Tanasulay (Citizenship Waived Medical Plus), ama CWM Plus), oo ay ku jiraan caymiska dhalmada kadib ah
 - Medicaid-ka Xaaladaha Degdega ah ee loogu talagalay dadka da'doodu tahay 24-56 (sida, Ragga Carruur La'aanta ah ee Shaqeeya (Childless Working Male, CWM))
 - Dhammaan dadka kale ee waaweyn (sida, Medicaid iyo Heelthiyar Oregon)
- Caymiska caafimaadka dhalmada/taranka
- Barnaamijka Oregon MothersCare
- Sablimental Naturishan Asistans Borograam (SNAP) ama kaadhadhka cuntada, oo ay ku jiraan EBT-da Cudurada Faafa
- Guryaha dadweynaha iyo guryaha la kaabay ee Qaybta 8
- Kaalmada kirada ee Qaybta 8 (sida, foojarrada xulashada guryaha)
- Haweenka, Dhallaanka iyo Carruurta (WIC) (gargaarka nafaqeynta ee loogu talagalay haweenka, dhallaanka, iyo carruurta jira ilaa da'da 5)
- Baaritaanka, daryeelka, iyo tallaalka COVID-19
- Cuntada ka imaanaysa bangiga cuntada ama sanduuqyada cuntada
- Kaalmada ama caawimadaha loogu talaglaay xaaladda degdegga ah ama wakhtiga musiibada
- Adeegyada waxbarashada gaarka ah oo lagu maalgeliyo Dhis-abilitis Ejukashan Akt (IDEA) ee Medicaid ay daboosh.
- Adeegyada caafimaadka ee iskuulka laga helo kuwaas oo loogu talagalay caruurta iskuulka dhigata
- Aali Heedh Istart iyo Heedh Istart/Oregon Birikindhargaaten
- Barnaamijka Qadada Dugsiga oo bilaash ah ama qiimaha la dhimay
- Sooshiyaal Sikiyuuritiga Hawlgabka
- Medicare
- Kaabista Kaalmada Dakhliga Hoose ee Qaybta D Medicare
- Ooldha Ameerikans Akt (OAA).
- Barnaamijyada uu gobolku maalgeliyo ee lagu caawiyo dadka waaweyn iyo dadka naafada ah (sida, Mashruuca Oregon ee Madaxbanaanida)

- Caymiska Shaqo La'aanta
- Kabista khidmadaha caymiska caafimaadka ee loo maro Suuqa Caymiska Caafimaadka ee Oregon
- Magdhowga Shaqada La Xiriirta
- Daryeelka Maalinta ee caruurta
Iyo barnaamijyo kale oo badan oo caafimaadka iyo adeegyada bulshada ah oo aan halkan ku jirin

Helitaanka gunnooyinka dadweynaha oo keliya *kama dhigeyso qofka mid qaata bablik jarj.*

Imtixaanka bablik jarj:

- Waxaa lagu eegayaa dhammaan xaaladaha qofka aan muwaadinka ahayn - ma aha oo kaliya haddii ay u badan tahay inay isticmaalaan gunnooyinka dadweynaha.
- Sida uu dhigayo sharciga socdaalka ee federaalka, wuxuu eegayaa
 - "Da'da; caafimaadka; xaaladda qoyska; hantida, agabka, iyo heerka dhaqaale; iyo waxbarashada iyo xirfadaha" qofka aan muwaadinka ahayn
 - Foomka I-864 oo la buuxiyay (Dhaarta Taageerada), oo la soo gudbiyo iyadoo laga wakiil yahay qofka aan muwaadinka ahayn, iyo
 - Helitaankii hore ama helitaanka hadda ah ee kaalmada lacagta iyo daryeelka hay'adaha ee muddada dheer ee ay dawladdu bixiso.

Su'aalo ma qabtaa? Kaligaa ma tihid Waxaa jira caawimaad.

- Khadka tooska ah ee Bablik Binifitis Oregon ka wac 1-800-520-5292.
- Raadi [Hagaha Adeegyada Sharciga Socdaalka Qaranka](#) si aad u hesho adeegyo sharci oo bilaash ah ama qimo jaban.
- [Raadi](#) qareenada socdaalka gaarka ah ee laga helo aaggaaga.
- Dadka degan Oregon qaarkood aaya laga yaabaa inay u qalmaan matalaad bilaash ah ee Maxkamadda Socdaalka Portland iyada oo loo marayo Hay'adda Iqwiti Kobs ee Oregon. Wax badan ka ogow oo caawimaad ka raadso [halkaan](#).
- Hel caawimaad la xiriirta arrimaha kale ee sharciga ah sida guryaha, haysashada masuuliyadda daryeelida carruurta, furriinka, shaqada, xuquuqda dhibbanaha, iyo in kale oo badan adigoo ka eegaya [Buuga/Hagaha Oregon Low Helb ee hay'adaha adeegyada sharciga aan faal'iido doonka ahayn](#) ama [Adeegga Gudbinta Qareenka ee Istayt Baar Oregon](#).
- La soco wixii cusub adigoo booqanaya [protectingimmigrantfamilies.org](#).